

Adeegyada Kordhinta ee Adeeg-Bixiyaha Madaxbanaan

Habka loogu talagalay adeeg-bixiyeyaasha DD ee hadda

Marka ka qaybqaataha u wareego Medicaid HCBS DD cusub, adeegyadoodu waxay noqonayaan kuwa cusub. Adeeg-Bixiyaha madaxa banaan waa inuu dhamaystiraa nidaamka diiwaangelinta kahor inta aan loo oggolaan inay bixiyaan adeegyada. **Adeeg-Bixiye madaxbanaan waa in loo diwaan galiyo adeegyo cusub marka ka qaybqaataha ay la shaqeeyaan ay beddelaan adeegyada laga cafiye. Taariikhda ka qaybqaataha uu u beddelo adeegyada laga cafiye cusub waxa xidhmi doona dhammaan oggolaanshaha adeegyadii hore.**

Ka qaybqaataha aya doortay adeegyo cusub

- Iskuduwaha Adeegga ka qaybqaataha (SC) waxa uu ka hadlayaa shuruudaha adeeg-bixiyayaasha madaxa banaan ee adeegyada cusub ee ka qaybqaataha uu doorto.
- SC-du waxay dhamaystiraysaa qaybta wakaalada ee gudbinta waxayna u dirtaa gudbinta ka qaybqaataha ama masuulkooda.
- Ka qaybqaataha, masuulka, ama adeeg-bixiyayaasha madaxa banaan waxay dhamaystiraan qaybtooda waxayna u soo diraan iimaylka Xafiiska Dhexe ee DD ee dhhs.ddproviderreferrals@nebraska.gov.
- Adeeg-Bixiyaha madaxa banaan wuxuu dhamaystiraa shuruudaha adeega cusub, sida lagu qeexay [Bulletin Bixiyaha 17-07..](#)

Xiriirada Shaqaalaha Xafiiska Dhexe ee DD Maximus

- Xafiiska Dhexe ee DD wuxuu u soo diri gudbinta la dhammeeyay Maximus adeeg-bixiyaha madaxa banaan si loogu ansixiyo adeegyada cusub.
- Maximus wuxuu iimayl u diraa adeeg-bixiyaha madaxa banaan tilmaamo ku saabsan sida loo dhamaystiro diiwaangelinta adeeg-bixiyaha Medicaid ee Maximus portal.

Cusboonaysiinta Adeeg-Bixiyaha Diiwaangelinta Ugu Badan

- Adeeg-Bixiyaha madaxa banaan wuxuu dhamaystiraa diiwaangelinta Maximus.
 - **Diiwaangelinta Maximus waa in si buuxda loo dhammaystiraa iyadoo dib loo kaydinaayo bog kasta oo ka mid ah diiwaangelinta adeegga.**
 - Xariirka Maximus waxaa laga helaa: www.nebraskamedicaidproviderenrollment.com
 - Diiwaangelinta waa in lagu dhammeeystira kombuyuutar. Portalka Maximus lagama heli karo taleefanka gacanta ama tablet-ka.
- Adeeg-Bixiyaha madaxa banaan wuxuu sugayaa ogaysiinta Maximus in loo ogolaaday adeegyada cusub.
- **Marka Adeeg-bixiyaha uu qabo wax su'aalo ah oo ku saabsan heerka isdiiwaangelintooda, waa inay si toos ah ula xiriiraan Maximus lambarkooda bilaashka ah (844) 374-5022.**

Adeeg-Bixiyaha waxaa Loo Ogolaaday Adeegyada Cusub

- Maximus wuxuu iimayl u diraa xafiiska dhexe ee DD iyo adeeg-bixiyaha madaxa banaan marka isdiiwaangelinta la ogolaado.
- Xafiiska Dhexe ee DD wuxuu u ogolaanayaa SC ka qaybqaataha inuu ogaado adeeg-bixiyaha la ansixiyay.
- SC waxay dhamaystiraysaa oggolaanshaha adeegga ee adeegyada cusub.
- Adeeg-Bixiyuhu waxa uu qirayaa oggolaanshaha adeegga, kadib adeeg-bixiyaha waxa laga yaabaa in uu bilaabo bixinta adeegyo cusub ka qaybqaataha.